

الرسمية



الجريدة

FAAFINTA

RASMIGA AH

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka Gaad

Muqdisho, 15 Disembar 1977 L. IR 12

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

5 hi in

100

Shs

r 2

laga bixinayaa Xa

ee

KOONNIIN

BOGGA KOWAAD

SHARCI L. 73 ee 12 Juunyo 77, Wax ka beddelid qod. 68 ee Xeerka Sharciga (Decreto Legislativo) Lam. 1 ee 31.3.1964. Xukunnada la xiriira ee ka soo baxaan Waaxyaha Socota ama Maxkamada Hoose ee Maxkamadaha Ciidammada ee Dagaalka.

BOGGA LABAAD

W. M.

BOGGA SADDEXAAD

IYO WIXII LA MID AH

W. M.

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho.

SHARCI L. 73 ee 12 Juunyo 1977.

Wax ka beddelid qod. 68 ee Xeerka Sharciga (Decreto Legislativo) lam. 1 ee 31.3.1964.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida laad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada Lam. 17, 18 iyo 19 ee 1 Luulyo 1976 ee Habka Maamulka Ciid ee Dawladda oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga Tir. yahay 54/Bis ee 1 Agoosto 1976 ee Dhisidda Waaxyaha Socota ee Maxkamadaha Ciidamada ee Dagaalka ;

ISAGOO AQOONSADAY : Inay tahay lagama maarmaan in qodobka 68 ee Xeerka Sharciga (Decreto Legislativo) Lam. 1 ee 31.3.64 la beddelaa ;

ISAGOO TIXGELIYEY : Go'aanka Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed fadhigiisii aan caadiga ahayn ee 13.11.1977 ;

WUXUU SOO SAARAYAA

Qodobka 1aad

Xukuunnada la xiriira ee ka soo baxaan Waaxyaha Socota ama Maxkamadaha Hoose ee Maxkamadaha Ciidamada ee Dagaalka waa kama dambays, rafcaan meelna loogama qandankaro.

Qodobka 2aad

Sharci kasta ama xeer kasta ee ka hor jeeda sharcigan waa la buriyay gaar ahaan qodobka 68 ee Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee 31.3.1968.

Qodobka 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa marka laga bilaabo 1.8.1977. Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmi ah ee Dawladda.

Muqdisho, 15.12.1977

MADAXWEYNAHA JAM. DEM. SOOMAALIYA
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre